Macluumaa
dka
qaabka bayaanka garka ah iyo
duruufaha dhaqaale
marka la codsanayo kaalmada sharciga ama nidaamka caawimada kharashaadka

- Fadlan ku hayso xaashidan macluumaadka ah iyo nuqulka foomka la buuxiyaya diiwaanadaada --

Tilmaamaha Guud

Waa maxay kaalmada sharciga ama nidaamka caawimada kharashaadka?

Haddii aad gubiso tallaabo ama aad rabto inaad codsi u gudbiso maxkmadda, waa inaad bixisaa kharashaadka maxkamadda sharic ahaan. Haddii sharcigu baneeyo in qareen ku matelo, ama haddii metelaada qareenka ay lama huraan u tahay asbaabo kale, tan iwaxay ka dhigantahay kharash dheeraad ah. Sidoo kale si la mid ah waxaad gashaa kharashaad marka aad difaacayso naftaada gudaha dacwada maxkamadda.

Kaalmada sharciga ama nidaamka caawimada kharashaadka waxaa loogu talo galay inay awood kuu siiso adiga inaad raadsio ama difaacdo xuquuqahaaga haddii aanad awood u lahayn inaad buuxiso kharashaadkan ama aad qayb ahaan keliya buuxin karto. Sidoo kale waa la horumarin karaa haddii aad u baahnatahay inaad ka daba tagto fulinta khasabka ah si loo dhaqan geliyo sheegasho.

Kumaa hela kaalmada sharciga ama nidaamka caawimada kharashaadka?

Tallaabada Kaalmada Sharciga (*Gesetz für die Prozesskostenhilfe*) waxay ka dhigaysaa kuwa soo socda arrimahan:

> "Kooxda kuwaas oo sida waafaqan duruufahiisa/keeda gaarka ah iyo kuwa dhaqaale aan awood u lahayn inuu bixiyo kharashka dacwada, ama qayb keliya ama si qaab hafto ah, waxa uu heli doonaa kaalmada sharci marka codsiga haddii niyada lagu hayay in la raadsado xuquuqada ama difaaca xuquuqaha niyada lagu hayo ay leeyihiin rajooyin ku filan wixii ah guusha oo aanay u muuqan inay yihiin kuwa barkuma taal ah.
>
> Raadsashada xuquuqaha ama xuquuqaha difaaca waxaa loo arkaa barkuma taal haddii kooxda taas oo aan sheegin kaalmada sharci ay ka horjoogsan lahayd raadsashada xuquuqaha ama xuquuqaha difaaca ay ahaayeen dhammaan duruufaha si macquul loo miisaamaay in kastoo ay jiraan rajoon guusha ah oo ku filan."

Tan sidoo kale waxaa lagu dabaqaa caawimaad kharashaadka nidaamka ah.
Sidaas awgede dwaxaad xaq u leedahay haddii aad

- aad u baahantahay inaad raadiso dacwada oo aanad awoodi karin keliya kharashaadka lama huraanka ah**iyo**
- qiimaynta maxkamada malaha rajo keliya oo guusha ah, **iyo**
- kaama horjoogsan karto raadsashada dacwada haddii aad bixinayso kharashka laftaadu.

Tani si kastaba ha ahaatee **xaq** uma laha kaalmada sharci ama caawimada kharashaadka nidaanka haddii **caymiska ilaalinta sharci**ama **koox kale** ay qaadan lahayd kharashaadka. Sidoo kale lama siin haddii qof kale ay waajib ku tahay buuxinta kharashaadka iyaddoo ay sababtu tahay waajibaadka sharci ee dayactirka (kharashka qadan oo sharci ama nidaameed). Tani waxay noqon kartaa xaaska/lamaanaha madaniga ah ama wata ilma aan xaas ahaan lagu dhalin oo waalidka ama waalidiinta.

Waa maxay kaalmada sharciga ama nidaamka caawimada kharashaadka.

Kaalmada sharci ama nidaamka caawimada kharashaadku waa dheef lacageed oo daryeelka gobolka ah oo waxa qayb ka tahay maamulka cadaalada. Haddii aad hesho kaalmada sharciga iyo ama caawimada kharashaadka nidaamka, uma baahnid inaad bixiso, ama keliya bixi qayb, kharashaadka maxkamadda iyo kharashaadka wakiilnimadaada ee qareenka iyaddoo ku xidhan duruufahaaga gaarka ah iyo kuwa dhaqaale. Waxaad bixin kartaa ugu badnaan ilaa
48 bilood oo hafto ah oo ka timid dakhligaaga. Qadarka haftooyinkan bil kasta ah waxaa dejiya sharciga.

Kharashka wakiilnimadaada ee qareenka waala bixiyaa haddii maxkmaddu ay kuu magacowdo

qareen ama dadka kale oo loo magacaabi karo sidan. Tan waa in loogu dabaqaa si gaar ah. Qareenka waa inuu had iyo jeer joogaa degamdda maxkamaddu ay ku taalo. Haddii kale, maxkamaddu waxay keliya u hogaansami kartaa codsiga magacaabista haddii wax kharash ah oo dheeraad ah aan la gelin,

Haddii duruufahaaga si wayn ay u horumaraan, waxaad sidoo kale si hore u dhaqan gashay lagugu soo dalaci doonaa lacag bixinta ilaa muddada afarta sano ah ee ay ku dhacayso laga bilaabo xukumistii u dambaysay ama joojin kale oo nidaamkan ah. Haddii duruuftaadu ay ka si xumaato, sidoo kale waa suuragal in la yareeyo haftooyinka la qorsheeyay.

Muuhim:

Muddada dacwada maxkamadda iyo gudaha muddada afar sanadood ah laga bilaabo wakhtiga helida xukunka ama joojinta kale ee dacwada, waxaa kugu waajib ah inaad ku wargeliso maxkamadda wixii horumar wayn ah oo duruufahaaaga dhaqaalaha ah ama beddelka cinwaanka si degdeg ah iyaddoon laga codsan inaad sidaas samayso. Sida ku saabsan dakhliga gaarka ah, horumar kasta oo ka badan 100 Yuuro (wadarta guud) bishiiba waa in lagu wargeliyaa haddii aanay ahayn lacag kuusan oo wada socota. Haddii jarjarista la xaqiijiyay la yareeyay (kharashka guriga, waajibaadka lacag bixinta dayactirka ama culaysyada gaarka ah), ama haddii ay joojiyaan dhammaantood, waa inaad sidoo kale waadataa hindisaha si aad ugu wargeliso iyaga haddii yaraynta culaysku dhaco wax ka badan hal mar iyo wax ka badan 100 Yuuro bishiiba. Horumarka wayn ee duruufaha dhaqaalaha sidoo kale waxay dhici kartaa fadliga adiga oo helaya shay sidii natiijada xaqiijinta ama xuquuqaha difaaca ah. Waxaad sidoo kale u baahantahay inaad tan ku wargeliso maxkamadda. Haddii aad jebiso waajibaadyadan, oggolaanshaha raadka ka noqoshada leh waxaa dhici karta in la laalo, oo marka xigta waa inaad bixisaa kharashka.

Khatarahee u baahan in laga fekero?

Haddii aad u baahantahay inaad maxkamadda tagto, waa inaad ku bilowdaa helitaanka macluumaadka dhabta ah sida suuragalka ah ee qadarka maxkamadda **iyo** kharashka qareenada la filayo. Tan sidoo kale waxa lagu dabaqaa xaalada kaalamda sharci ama caawimada kharashka nidaamka kuwaas oo **aan meesha ka saarin dhammaan kharashka khataraha**

Gaar ahaan, ma daboosho kharashka kuwaas oo dhinaca ka soo horjeedaa uu galo wixii ah wakiilnimadeeda qareenka. **Haddii aad ku khasaarto dacwada maxkamada, waa inaad lacag u celisaa ah kharashaadka dhinaca kaa soo horjeeda xataa haddii lagu siiyay kaalmada sharciga ama caawimada nimaadka kharashaadka.** Ka reebid ayaa lagu dabaqaa maxkamadda shaqada, halka**tusaalaha u horeeya**, kharashaadka wakiilnimada dhinaca ka soo horjeeda uma baahna inay lacag celiyaan haddii aad khasaaarto.

Kharashaadku hadda kor uu ku yeeshay qareenka wakiilka kaalmada sharci iyo kharashaadka caawimada nidaaka dacwada. Waa inaad bixisaa kuwan haddii codsigaaga la diiday. Kuwa la mid ah ayaa lagu dabaqaa kharashaadka maxkamadda kuwaas oo hadda ka hor la galay iyo kuwa weli aan la gelin.

Sidee loo helaa kaalmada sharciga ama nidaamka caawimada kharashaadka?

Codsiga waa in loo sameeyaa kaas oo aad ku sharaxayso khilaafka si faahfaahsan oo buuxda. Codsigu si gebo geba ah waa inuu u muujiyaa " rajooyinka guusha oo ku filan" maxkamada sida sharcigu u baahanyaay (ee kore). **Caddaynta** waa in qoraal ahaan loo soo xigtaa. Waa inaad la tashataa talada sheciga su'aalahan haddii ay lama huraan tahay. Waa inaad sidoo kale waydiisaa wax ku saabsan **Xeerka Kaalmadda Talada Sharciga** (*Beratungshilfegesetz*), si waafaqsan dadka leh dakhliga hoose oo haysta hanti yar waxay sheegan karaan talo sharci oo bilaash ah ama qiima jaban oo ka baxsan wakiilnimada maxkamadda.

Sidoo kale waa inaad ku lifaaqdaa codsiga **bayaanka duruufahaaga gaarka ah iyo dhaqaalaha** (duruufaha qoyska, shaqada, hantida, dakhliga iyo culaysyada), siiba **nuqulada**warqaddaha**ku habboon**. **Waa inaad foomkan u isticmaashaa bayaankan.** Kaalmada sharci ama nidaamka caawimada kharashaadka waxay mabda' ahaan ansixin kartaa wakhtiga ka dib marka codsiga la gudbiyo, ay ka mid tahay bayaanan iyo dhammaan warqaddaha lama huraanka ah. Foomkan codsade kastaa si gaar ah ayuu ubuuxinayaa. Codsadyaasha aan qaan gaadhin, duruufahooda gaarka ah iyo dhaqaalaha, siiba kuwa dadkan waajibka ay ku tahay inay siiyaan dayactirka, waxaa lagu sheegayaa nuqulo dheeraad ah oo foomka ah.

Maxkamaddu waxay go'aan ku gaadhaa haddii lagu siinayo kaalmada sharci ama nidaamka caawimada kharashaadka. Maadaama lacagta loo heli karo kaalmada sharci ama nidaamka caawimada kharashaadka ay dad waynahu ku bixiyaan cashuur ahaan, maxkamaddu waa inay baadhaa haddii aad xaq u leedahay kaalmada sharci ama nidaamka caawimada kharashaadka.

Foomkan waxaa loogu talo galay in lagu fududeeyo baadhitaankan. Fadlan sidaas awgeed fahan inaad muujinayso duruufahaaga gaarka ah iyo dhaqaalaha.

U akhri foomkan si feejigan oo qaab masuulino buuxda ah u dhammaystir.

Waxaad ka heli doontaa macluumadka dhammaystirka foomka xaga hoose. Haddii ay dhibaato kaa haysato dhammaystirka foomka, waxaad la tashan kartaa talada sharci ama waxaad tegi maxkamadda. Haddii ay jirto meel aan ku filnayn foomka guudkiisa, waxaad ku bixin kartaa macluumaadka xaashi dheeraad ah. Fadlan ku sheeg xaashida dheeraadka ah bogoska habboon.

Muuhim:

Maxkamaddu waxya ku waydiin kartaa inaad soo gudbiso warqaddaha maqan iyo inaad ku xaqiijiso macluumaadka foomka warbixin dhaar ah. Haddii aanad bixin warqaddaha ku xiga ee la cosaday, tani waxay sababi kartaa in codsiga kaalmadaada sharci ama nidaamka caawimada kharashka in la diido.

Haddii aad bixiso macluumaad aan dhammaystirnayn ama khalad ah, tani waxay sababi kartaa kaalmo sharci ama caawimada kharashaadka nidaamka hadda ka hor la bixiyay in lala noqdo, oo marka dambe waa inaad bixisaa kharashaadka aad gashay. Tani waxay sidoo kale dhici kartaa haddii, muddada dacwada maxkamadda iyo gudaha muddada afar sanadood ah laga bilaabo wakhtiga helida xukunka ama joojinta kale ee dacwada, aanad ku wargelin maxkamadda wixii horumar wayn ah oo duruufahaaaga dhaqaalaha ah ama beddelka cinwaanka si degdeg ah iyaddoon lagu baaqin inaad sidaas samayso. Haddii si ula kac ah aad samayso warbixino khaldan ama aan dhammaystirnayn, tan waxaa loogu oogi dacwad sidii fal dambiyeed.

Dhammaystirka Macluumaadka

Fadlan dhammaystir**dhammaan qaybaha** foomka**gebi ahaanteedba**. Haddii aad rabto inaad ku jawaabto **maya** wax ka mid ah su'aalaha, fadlan geli isku tallaab boqoska ku habboon. Fadlan ku lifaaq **nuqulada** qaybahii u dambeeyay **ee warqaddaha lama huraanka ah**, tiro u samee iyaga oo geli tirooyinka bogoska lagu bixiyay cidhifka.

A Fadlan sharax **shaqada faa'iidada leh** taas oo aad ka hesho dakhligaaga (Qaybta E ee foomka).

B Haddii aad hayso **caymiska ilaalinta sharciga ah**, waa inaad marka ugu horaysa u dhowaataa shrikada caymiska. **Fadlan had iyo jeer raaci nuqul warqadda xeerka caymiska,** Haddii shirkada caymiskaagu ay hadda ka hor diiday inay buuxiso kharashaadka, fadlan sidoo kale raaci nuqulka warqadda diidmada. Haddii aad xubin ka tahay urur kaas oo caadi ahaan siiya ilaalinta sharciga xubnaha wixii ah khilaafyada sharciga sida kuwaaga (tusaale **ururka ganacsiga, kiraystayaasha ururkooda ama ururada bulshadda**), waa inaad sidoo kale ugu dhowaataa ururkan sidii arrin ahmiyad ah. Oggolaanshaha kaalmada sharciga ama kahrashaadka caawimada nidaamka looma tixgelin doono sharci ahaan ilaa ururku uu diido inuu ku siiyo ilaalinta sharciga ah mooyee. Haddii aad u baahantahay inaad buuxiso foomka ka dib kaalmada sharci ama kharashaadka caawimada nidaamka la bixiyay si loo baadho duruufaha gaarka ah iyo dhaqaalaha, uma baahnid inaad ku bixiso macluumaad dheeraad ah halkan.

C **Waajibaadyada dayacirka sharciga**sidii arrin mabda'a ah uu ka jiro dhexda qaraabada tooska ah (taas oo tusaale ahaan waalidka dhanka carruurtooda iyo taa lidkeed), u dhexaysa xaasaska, u dhaxaysa lamaanaha madaniga ah iyo u dhaxaysa hooyooyinka aan xaaska ahayn iyo ilmaha aabbaha ka dib dhalashada ilmaha. Shaagashada dayactirka in dheeraada waxay shardi u tahay

- kooxda xaqa u leh waxa uu awoodayaa inuu ilaaiyo naftiisa/nafteeda, iyo
- kooxda waajibku saaranyahay inay dayctirka bixiso waxay dhaqaale ahaan awoodaa inay bixiso dayactirka, iyaddoo xisaabta ku darsanaysa waajibaadkiisa/keedakale,

Carruurta waa wayn markaa guud ahaan sidoo kale waxay leeyihiin sheegasho dayactir sharci ah oo ku lid ah waalidkooda ilaa inta ay ku jiraan **dugsiga ama** gudaha **tababarka xirfadaha**ama ay wax baranayaan. Maxkamaddu waxay u baahantahay **macluumaad dheeraad ah**oo ku saabsan duruufaha gaarka iyo dhaqaalaha ee kooxaha waajibku ka saarayn yahay dayactirka. Macluumaadkan waxaa la siin karaa xaasaska (ay ka mid yihiin haddii ay kala maqan yihiin) iyo lamaanayaasha madaniga ah ee Qaybaha E ilaa J ee foomkan. Xaaladaha kale, fadlan isticmaal **nuqulka kale** ee foomkan, laakiin buuxi Qaybta A siiba D ilaa J: haddii kooxda ay ku waajibka tahay inay bixiyaan dayactirka ay diido inay la shaqayso, fadlan sheeg sababta diidmada iyo waxaad ka ogtahay ee ku saabsan duruufahooda gaarka ah iyo dhaqaalaha.

D Haddii aad dayactirka siiso **qaraabada**, tan waxaa looga fekeraa marka la ansixinayo kaalmada sharciga ama caawimada kharashaadka nidaamka. Sidaas awgeed waa dantaada inaad sheegto kuwa ay yihiin dadka aad siinayso dayactirka, iyaddoon lo eegin haddii aad u siinayso dayactirka si gaar ah addoo maraya lacag bixinta lacageed iyo haddii dadka ay haystaan dakhligooda. Dakhliga qofka aad siiso dayactirka sidoo kale waxaa ka mid ah lacag bixinta dayactirka ee ka timid kooxda saddexaad, gaar ahaan kuwan ka yimid waalidka kale ee ilmaha wada jirka, ama gunnada tababarka la siiyo ilmaha xaqa u leh dayactrka. **Waa inaad ku lifaaqdaa warqaddaha lama huraanka ah oo wata macluumaadka (tusaale cinwaanka dayactirka, caddaynta lacag bixinta)**

E **Dakhliga shaqada** waa mushaharka gaarka ah ama mushahaarka. Waa inaad sheegtaa dakhliga guud ee bishii la soo dhaafay ka hor inta aan codsiga la gubin. Fadlan sheeg fasaxa ama gunnooyinka Kirismaska iyo waxyaabaha kale ee lacagta wada socota ah ama dakhliga aan gaarka ahayn si gooni ah xaga "dakhliga kale". Nuqulada soo socda waa in la raaciyaa;

1. **warqadaha mushaharka todobaadka ama mushaharrka ee goobta shaqada labba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay ka hor inta aan codsiga la soo gudbin;**

2 haddii la heli karo, **ogaysiiska dakhliga carruuta u dambeeyay ee ka soo baxay xafiiska cashuurta** , haddii kale shahaadada **mushaharka cashuurta muujinaysa wadarta guud iyo dakhliga go'an ee sanadkii hore**.

Foomak dakhliga **shaqada mutadacnimada ah, ganacsiga ama beeraha iyo kaymaha** waa in lagu sheegaa qadarka bilaha ah ee hadda. Mid la mid ah ayaaalagu dabaqaa gelinta kharashka **hawlgalada habboon** sidii jar jarida Qaybta F. Fadlan ku qor qadarada bilaha ah xaashida dheeraadka ah addoo adeegsanaya warbixinta dhaqaalaha gudaha ee keenaysa macaashka go;an. Sabaynta xiliyeed ama sabaynaha kale ee natiijada shaqaynaysa waa in lagu xisaabiyaa ku daritaanka habboon ama jarjarida. Fadlan geli foomka qadarada bilaha ah ee dakhliga iyo kharashka hawlgalida aad ka xisaabisay ee qiimaha wakhtigan. Haddii maxkamadda ay sidaas

codsato, waa inaad caddaysaa hawlagalada dakhliga ee wata qiimaha waafaqsan ee cashuurta dakhliga la bixiyay iyo kharashka hawlgalida oo wata warqaddaha taageeraya. **Nuqulada xisaabdkii dhowaa ee sanadka iyo ogaysiiskii u dambeeyay ee cashuurta ee muujinaysa dakhliga ee la gartay in lagu lifaaqo.**

Haddii aad dakhli ka hesho **kiraynta**, siiba **hantida raasamaalka** (tusaale, dulsaarka lacagta la kaydsado ama macaashka la qaybsado), fadlan geli hal- labba iyo tobanaad dakhliga sanadlaha ah ee la filayo.

Haddii aad u hesho **lacagta dayactirka**naftaada iyo carruurtaada, keliya qadarka waa in la geliyaa warbixintaada taas oo loogu talo galay dayactirka. Fadlan geli qadarka loogu talo galay carruurta qaybta ka labbaad ku xigta ee Qaybta D. Fadlan sidoo kale ku jawaab Haa su'aasha helida dayactirka haddii dheefta lagu siiyo adiga aan ahayn dayactirka sanadlaha ah, laakiin sidii **dheef muuqata** (sida hoy aan kiro lahayn, cunto, iyo dheefo kale oo guriga waalidkaaga ah, dheefaha lamaanaha ee wada joogista la isla oggolyahay). Waa inaad gelisaa qiimaha la qiyaasay ee dheefahan Qaybta E.

Sida **dakhliga ka yimaada** lacagta hawlgabka, dheefaha shaqo la'aanta II, mushaharka bukaanka, gunnada waalidka, horumarinta tababarka ama dheefaha kale ee bulshadda, **nuqulada ogaysiiska oggolaanshaha u dambeeyay iyo warqaddaha muujinaya qadarka hadda ee dheefaha waa in lagu lifaaqaa**.

Waa inaad in dheeraad ah sheegtaa qiimaha lacageed ee dhammaan dakhliga **kale** ee aanay daboolin laymankii hore ee foomku, ay ka mid tahay dheefaha muuqada (tusaale, dheefaha nooc ahaan, cunto bilaasha ama dheefo kale oo aan lacag caddana ahayn, hoy aan kiro ahayn waa in si kastaba ha ahaatee keliya lagu sheegaa halkan haddii kharashaadka hoyga lagu sheegay Qaybta H).

F Waxaad sheeganaysaa jarjarida **soo socota**:

1. **cashuurta** lagu bixiyay dakhliga (ay ka mid tahay cashuurta kaniisada, cashuurta ganacsiga, laakiinmaaha caashuurta dakhliga) iyo cashuurta dowladeedka ah;
2. caymiska **bulshadda waajibka ah** tabarucaadka (tusaale,. lacagta hawl gabka, caymiska caafimaadka, caymiska shaqo la'aanta iyo daryeelka xiliga dheer);
3. taarucaadka **shrkaddaha dad waynaha ama ku gaarka looleeyahay ama hay'addo la mid ah**, laakiin keliya ilaa qadarka kuwan uu sharcigu dhigay. Haddii caymiska aanu sharcigu dhigin, tabarucaadka waxaa keliya laga jari karaa ilaa qadarka uu caymisku ku habboonyahay marka loo eego sifadeeda iyo xadka. Fadan ku sharax sifada iyo xadka caymiska xaashi dheeraad ah haddii tani aanay ku caddayn nuqulada warqada kuwaas oo lagu lifaaqayo (tusaale, shahaadada caymiska, xisaabinta tabaruca);
4. **safar iyo kharashaadka kale ee dakhliga la xidhiidha**, taasi waa kharashka lama huraanka ah si loo helo, loo sugo oo loo joogteeyo kharashka (tusaale, sidoo kale dharka shaqada, ka qayb noqoshada ururka ganacsiga). Haddii aad sheegato kharashka safarka shaqada, fogaanka keliya ee kiloomitirka waa in la sheegaa, haddii baabuur la isticmaalay, sidoo kale sheeg sababta gaadiidka dad waynaha aan loo isticmaalin. Haddii aad dakhli ka hayso shaqada iskaa loo shaqayto, fadlan ku sheeg kharashka hawleed halkan.

Kharashka guud ee nolosha (tusaale, cunto, dhar, telefoon ama koronto haddii aan loo baahnayn kulayliska) waxaa ku xisaabtamaya maxkmadda xaga hindisaheeda qadarka ka reebanaanta sharcigu dejiyay.

G **Dhammaan kootooyinka baanka, hantida dhulka iyo guryaha, baabuurta, qadarka lacagta caddaanka ah, xeerarka caymiska nolosha, xeerarka caymiska lacagta hawl gabka ah iyo hantida kale** (ay ka mid tahay kuwan dibadda ku yaala) waa in halkan lagu sheego halka aad leedahay adigu, xaaskaaga/lamaanahaaga madaniga ah, keliya si gooni ah ama wada jir ah. Haddii mid ama dhowr qof ay yihiin kuwa la leh mulkiyada, fadlan sheeg qaybta aad adigu leedahay, xaaskaaga/lamaanaha madaniga ah. Nuqulada warqaddaha habboon waa in lagu lifaaqaa. Intaa waxa dheer, maxkamaddu waxay waydiin kartaa warqaddo dheeraad ah sabab loo cudur daaray awgeed (tusaale ahaan warbixinta baanka ee muddada dheer ee xiligii la soo dhaafay).

Sidoo kale waxaa lagu siin karaa kaalmo sharci ama caawimada kharashka nidaamka haddii aad hanti leedahay, laakiin aad u shaqayso si aad u hubiso risig ku habboon ama lacagta hawlgabka ku habboon siinteeda. hantidan tusaale ahaan waa

- saami gal la ah baloodh mulkiile leeyahay dhul la dhisay,
- raasmaalka u adeegaya ujeedada bixinta lacagta hawlgabka gabowga ee ku jirta macnaha Xeerka Dakhliga Cashuurta (*Einkommenssteuergesetz*) biirinta ay horumaisay gobolku ("Riester pension"),
- gaadhi ku habboon haddii loo baahdo tababarka xirfadaha ama in shaqo la qabto,
- qadaro ka yar oo lacag caddaan ah ama qiimaha lacagta (sida waafaqsan Janaayo 2017, qadarada ilaa wadarta 5.000 Yuuro ee kooxda u baahan caawimada lagu daray 500 Yuuro qof kasta oo si wayn u helaya dayactirka ka yimid iyada).

Si kastaba ha ahaatee, waa inaad weli sheegtaa hantida!

Alaabta qoyska, dharka iyo walxaha looga baahanyahay tababarka xirfada ama in la qabto shaqo keliya waa la sheegi karaa haddii ay ka badanyihiin heerarka caadiga ah ama haddii ay yihiin walxo qiima sare ah.

Haddii aad hayso **dhul dhisme la horumariyay**, fadlan sidoo kale sheeg wadarka aaga gaarka ee loo isticmaalay ujeedo guryo ah ama ujeedooyin ganacsi, may keliya aaga aad adigu isticmaashay iyo qaraabadaada (Qaybta D ee sare).

Guryaha iyo dhulkana, qiimaha suuqa waa la sheegayaa (maaha qiimaynta qiimaha aasaasiga ah ama qiimaha caymiska dabka), ee uu la socdo **dhisida kootooynka bulashadda, kootooyinka bangiga, kootooyinka hadda lacagta lagala bixi karo ogaysiis la'aan, kootooyinka kaydsiga,** iyo kuwa la mid ah hadhaaga kootada wakhtiga xaadirka ah, ee leh **amniyaadka tirada, lambarka amniga** iyo qiimaha suuqa hadda, iyo xeerarka **caymiska nolosha** qiimaha qofka xeerka nolosha caymiska dhiiba. Nuqulada warqaddaha ahbboon (tusaale, shahaadooyinka bangiyada ama shirkadaha caymiska) waa in lagu lifaaqaa.

"**Hantida kale**" sidoo kale waxaa ka mid ah sheegashooyinka, dacwada furiinka gaar ahaan sidoo kale sheegashada qaybinta is leeg ee macaashyada is biirsaday.

Haddii isticmaalka hantida ay kaaga dhignaan lahayd dhibaato gaar ah adiga ama qaraabadaada, fadlan ku sharax tan xaashi dheeraad ah.

H Haddii **kharashaadka guriga** la sheegtay, fadlan sheeg meesha lagu noolyahay, tirada qolalka iyo wadarta tirada ee dadka ku nool meesha lagu noolyahay. Fadla ukala jebi kharashaadka sida lagu bixiyay foomka.

ka sakow **kharashaadka kulayliska**, kuwaas oo si gaar ah loo sheegayo, **kharashaadka taageerada kirada** ay yihiin **kharashaadka hawl galka** kuwaas oo ay kala qaybsadaan kiraystayaashu (tusaale, cashuurta dhismaha, saadka biyaha, qashin saarida,biyaha qashinka ah, nadiifinta jidka, daadinta qashinka, xaadhida dhuunta qiiqa, wiishka, korontada aaga la wadaago, nadiifinta dhismaha, anteenada bulshadda, iwm.) Kuwan si kastaba ha ahaatee kuma jirto gaasta ama kharashaadka korontada ee gurigaaga (halka aanay jirin karashka kulaylisku), telefoonka ama telefeeshanka iyo khidmada ruqsadda raadyaha.

Khidmadaha lacagta la amaahdo **guriga mulkiilahu ku jiro** waxa ka mid ah gaar ahaan lacagta haftooyinka amaahda ah ee loo qaatay dhismaha, iibsiga ama dayactirka. Halkan sidoo kale, ka sakow kharashaada kulaysliska, kuwaas oo gaar loo sheegayo, **kharashaadka dheeraadka ah** sidoo kale waxaa ka mid ah kharashaadka hawlgelida.

Haddii aad la wadaagto meel lagu nool yahay qof aan ahayn qaraabo kaas oo xaq u leh dayactirka (Qaybta D ee sare) fadlan geli qadarka nisbadda adiga kugu habboon. **Nuqulada warqaddaha habboon (tusaale, heshiiska kirada, shahaadooyinka amaahda, xisaabta kharahka shandadaha safarka) waa in lagu lifaaqaa .**

I Sidoo kale waa inaad ku lifaaqdaa nuqulada warqaddaha lama huraanka ah ee lacag bixinta bilaha ah iyo qadarka hadda ee daynka hadhay haddii aad gelisay waajibka lagu bixinayo si loo helo hantida lagu sheegayo Qaybta G.

J Haddii aad sheegato **culays gaar ah** fadlan sheeg qadarka bil kasta ah ama qadarada bilaha ah ee saami galka ah kuwas oo laga jarayo dakhligaaga ama ka xaaskaaga/lamaanahaa madaniga ah. Siiba warqaddaha, fadlan lifaaq sharaxaada xaashida dheeraadka ah. Culayska dayactirka ee xaaskaagaa/lamaanaha madaniga ah ee guurkii hore ama iskaashiga waxaa lagu sheegi karaa halkan. Haddi aad ku jirto xaalad gaar ah oo markaasna shuruudaha siinta baahiyaha dheeraadka si waafaqsan qaybta 21 ee Buugga II ee Summada Bulshadda (*SGB II*) ama qaybta 30 ee buugga XII ee Summada Bulshadda (*SGB XII*) lagu dabaqo, kuwan waxaa sidoo kale loo aqoonsadaa jarjaris. Tusaalooyinka kuwan waa:

- hooyooyinka filaya inay carruurta dhawaan dhalaan ka dib 12 todobaad oo uur ah
- dadka la nool mid ama dhowr carruur aan qaan gaadh ahayn kuwaa oo sugga daryeelkooda iyo korintooda keligood.
- dadka naafada ah kuwaas oo dheefo gaar ah la siiyo si waafaqan Buugga XII ee

Summada Bulhadda (*SGB XII*)

- dadka u baahan cunto qaali ah sababo caafimaad awgeed.

K Bayaanka waa in lagu saxeexaa laynka hoose ee kooxda isaga/lafteeda, xataa haddii uu soo wakiishay qareen. Xaalada wakiilnimada sharciga ah, wakiilka sharcigu waa inuu saxeexaa.